



Barxad lagu ciyaaro ayaa laga dhisayaa Richmond



Waxaan Xarunta Dhalinyarada ee Richmond kala shaqeynaynay sidii aanu u qaabayn lahayn garoon cusub oo kubbadda kolayga ah.

Howlaha shaqo ee dayactirka ayaa dhawaan la bilaabi doonaa. Inta barxada la cusbooneysiinayo, waxaa lagu sii ciyaari karaa barxada labaad ee ku taal Elizabeth Street

Iska qor cusboonaysiinta iimaylka si aad u hesho ugu horeayn naqshada cusub. Iska diiwaangeli homes.vic.gov.au/sign-up

Waxyaaba cusub oo loo sameyn doono muuqaalka

- ✓ Iftiimin la cusboonaysiiyey
- ✓ Meelo la fariisto oo cusub
- ✓ Calaamado muujinaya in da' kastaa ay meesha isticmaali karaan
- ✓ Meelo ay dad dadka kasta ka geli karaan iyo wadooyinka lagu lugooyo oo ballaaran
- ✓ Dhulka oo la cusbooneysiin doono

Nagu xirnoow



Kulamada la isku xog wareysanayo



Ra'yigii nalagula wadaagay kulamadii wadatashiga




Isdiwaangeli si aad ula socoto wixii soo kordha

Si aad wax kasta ula socoto booqo:



homes.vic.gov.au/richmond-precinct



nagala soco baraha bulshada raadi **Homes Victoria**

Soomaali | Soomaali

Maarso 2026



DHISMAHA GURYAHA EE WEYN

Richmond

Wixii ku soo kordhay Bulshada



Kaalay oo nagula damaashaad Richmond Community Festival

Waxaa imaan doona: *The Public Opinion Afro Orchestra, Ajak Kwai, Deadly Mase iyo 2 Fiddle Strings*

- Ku Soo Dhawoow Dalka oo uu ku luuqeynayo Uncle Robbie Thorpe
- Gawaarida cuntada
- Madadaalo ku haboon qoysaska
- Dukaamo ay goobta ka sameysteen adeeg-bixiyayaasha xaafadaada

Meesha ay iska galaan Lennox iyo Elizabeth Jimcaha 27-ka bisha Maarso, 3-da galabnimo ilaa 8-da habeenimo.

Waxaa lala kaashaday BANH iyo Golaha Deegaanka ee Yarra

Waxa ka dhacaya Richmond

Maarso 2026



Meelo dadka lagu dejiyo lagana qaadi karo oo ku taal Vere Street

Meelaha dadka lagu dejiyo lagana qaado ee ku taal Vere Street waxaan ka dhigi doonaa mid ammaankeedu wanaagsan yahay.

Laga bilaabo 16-ka bisha Maarso ilaa 26-ka bisha Juun shaqo ayaa waxay ka socon doontaa meesha laga galo Vere St ilaa Richmond West Primary School.

- Vere St lama geli karo oo waa ay xirnaan doontaa xilligaas ayada ah
- Dadka meesha degan iyo adeegyada gurmada degdega ah inay galaan waa loo oggol yahay
- Meelaha ay dadka ku lugeeyaan waa ay sii furnaan doonaan
- Maaraynta isu socodka hadda jira si ay kaga caawimaan meeshaad u bahan tahay inaad aado



106, 108, 110 iyo 112 Elizabeth Street



Dib u dhiska mustaqbalka



Rakibidda Mukeyfyada/ qaboojiyayaalka ayaa sii socota



Agagaarka xaafada



Casriyeynta amniga ayaa wali socota

- Waxaa mardhow la bilaabi doonaa in la sameeyo furayaal cusub oo lagu geli karo goobta, waxaana la dhameystiri doonaa sanadka 2026
- Tijaabinta albaabada amniga ee loogu talagalay meelaha dharka lagu dhaqdo ayaa la wadaa



Howlo shaqo oo la xiriirta tijaabada carrada

- Laga bilaabo bartamaha bisha Maarso qeybo ka tirsan aagga ayaa silig lagu wareejin doonaa si loo sugo amniga



Dayactir lagu sameynayo garoonka lagu ciyaaro Kubadda Kolayga

- Waxaa mardhow la bilaabi doonaa dayartir heer-tartan waxaana la dhameystiri doonaa badhtamaha 2026



Taageerada loogu talagalay dadka kirada ugu jira guryaha ee dib-u-dejinta loo sameynayo

9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo Talaado, Arbaco iyo Khamiis
112 Elizabeth Street

10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha
North Richmond Community Hub
110 Elizabeth Street



Elizabeth Street, Anderson iyo Williams Courts



Howlaha shaqo

- In la kormeero, lana sugo ammaanka guryaha laga guuray
- Waxyaabaha aan loo baahneyn oo laga saari doono guryaha la faaruqiya
- Mashiino yaryar ayaa goobta ooli doono si ay qashinka meesha uga nadiifiyaan
- Guryaha la faaruqiya, saqafyada dibadda iyo darbiyada ayaa waxaa laga qaadi doono muunado yar
- Shaqaaluhu waxaa laga yaabaa inay u isticmaalaan wiishash dhismaha dibaddiisa si ay marna kor u tagaan marna hoos u yimaadaan



5 Lewis Court iyo 161 Elizabeth Street 144 guryo dowlad oo cusub iyo goobo bulsho



Kiraystayaasha u guraya guryaha cusub

- Dadka ayaa sii wadi doona u guuritaanka guryaha cusub
- Gawaarida lagu guurayo ayaa laga yaabaa in la dhigto wadooyinka Elizabeth Street iyo Cooke iyo Lewis courts



Shaqadayada waxaa haga saacadaha shaqada ee golaha deegaankaaga:

Isniin ilaa Jimce

inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 6-da fiidnimo

Sabti

inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo iyo 3-da galabnimo

Dadka goobta degan ee u baahan macluumaad dheeraad ah hala xidhiidhaan xafiiska guryaynta ee deegaankooda:

1300 598 521

richmond.housing@dffh.vic.gov.au



Mararka qaarkood ogolaanshaha (permit) ay bixiyaan golaha deegaanka ayaa loo baahan yahay si looga shaqeeyo wax ka baxsan saacadahan laakiin dadka goobta degan waan la socod siin doonaa haddii ay tani dhacdo.



Dhammaan howlaha shaqooyinka waxaa lagu fulin doona heerarka ugu sarreeya ee badbaadada iyo shuruudaha sharciga.

Jadwalka hawlaha shaqo ee dib-u-dhiska

139 Highett Street iyo meelaha kor loogu soconayo ee Elizabeth Street iyo Williams iyo Anderson Courts

Lama samaynayo dumin inta ay dadku wali degan yihiin dhismeyaalkan.

Waan kuu joognaa



1. Inaad wax badan ogaato oo ay waxkastana ammaan kuu ahaadaan



Sugidda guryaha bannaan



Kormeerista goobta iyo dhismayaasha si qalabka loogu maareeyo si amaan ah



Joogtaynta dayactirka joogtada ah

Bartamaha-2026



2. Diyaargarowga

- Diyaarinayo goobta iyo calaamadaha wax haga/tilmaamaya si loo sugo ammaanka goobta
- Hubinta isku xirka adeegga
- Meesha laga galo in laga dhigo mid badbaado u ah dadka lugaynaya, baabuurta iyo baarkinka baabuurka
- Wax ka qabashada Dhismaha gudahiisa ayaa shaqo laga hayaa si looga dhigo meel amaan ah.

2026



3. Duminta

- Rakibaadda biraha wax lagu dhisayo (scaffolding)
- Waxa gudaha ku dhisan in lasoo saaro
- Dhismaha marka si taxadar leh oo tartiib-tartiib ah loo burburinayo
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonaada



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booqo: homes.vic.gov.au/information-in-your-language



Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

enquiries@homes.vic.gov.au